



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 5-aad
Documentiga Kal.5-aad/kul.18-aad

15/12/2014

Kalfadhiga 5-aad

Kulankiisa 15-aad Saac.Fur.12:40gh-Saac.Xir.1:00gh.

Guntinta(Qourum)-140

Ajendaha:

- 1)Furitanka Ayadaha Qura'anka kariimka**
- 2)Ansixinta Ajandaha**
- 3)Akhrinta 1-aad xeerka Isgaarsiinta Qaranka**
- 4)Akhrinta 1-aad Hindise Sharciyeedka libka Qaranka**
- 5)iyoo wixii kale oo howl ah**

Shir-guddoomiye Guddoomiyaha Baarlamaanka JFS. Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan Jawaari.

Waxaa shirka furey Guddoomiyaha Baarlamaanka JFS, **Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan(Jawaari)** waxaana lagu furey Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah uuna akhriyey Xildhibaan sheekh Shaacir.

Kadib,guddooyaha wuxuu sheegey in uu shirka furanyahay Ajandahana uu ka kooban yahay ilaa 5 qodob wuxuuna u soo jeediyey Xildhibaanada in ay ansaxiyaan, Xildhibaanadana way ansaxiyeen.

Wuxuu kaloo xildhibaanadda u sheegey Couramka in uu buuxsamo in ay ka qaadatey moddo badan taasina aynan anfaceyn ,hadda wixii ka danbeeyana ciddii shirka ka maqnaata waxaa loo gudbindoonaa Guddiga anshaxa ,xishood wax la yiraahdo ma jiridoonto ,Xildhibaan kii 8 fadhi maqnaada maalintii waxaa loo soo qorayaa ganaax \$100(BoqolDollar) ah.

Guddoomiyaha wuxuu sheegey in Qod.44 iyo 45-aad ee Dastuurka ay ku xusantahay qeybsiga had u yeerey Wasiir K/Xigeenka Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta Mudane Tako si ay u akhriyo Xeerka Isgaarsiinta Qaranka 2014ka.

Mudane tako wuxuu akhriyey Xeerka isgaarsiinta oo ka koobnaa 73 Qodob,wuxuuna sheegey in ay rabaan in ay gaarsiiyaan Dalka Horumar xagga Technoloyiyad Isgaarsiineyd oo Casri ah,ayna imaanayaan Shariikado Isgaarsiin eyd,wuxuuna sheegeyin mudnaanta ay siindoonaan Shariikadaha Dalka ka jira.shariikadaha Dalka imaandoona ay qadarindoonaan shariikadaha Lokalka ah.

Guddoomiyaha wuxuu sheegey Qod.44-aad Farq.3-aad ,haddey Xildhibaanadda wax ka qabaan ay u furantahay in ay wax ka weydiiyaan Wasiir K/X.Taako.

Su'aal

Xildh.Xagaafe wuxuu weydiiyey in Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta ay wada tashi la sameeyeen Goboladda Dalka iyo inkale?

Jwb.Wasiirka

Mudane Tako wuxuu sheegey in ay kala tashadeyn Goboladda fikradhoodana ay u soo gudbiyeen.

Su'aal

Xildh, Goodir, wuxuu sheegey in Xeerka isgaarsiinta qeybaha ay wasaaradda ay soo qortey, arinka Anteenoooyinka signalka dhibaataada dadka uu u geysanaayo aanan ku jirin ,haddaba maxaad ugu tala gasheyn?

Jwb.Wasiirka

Wuxuu sheegey in Qod. Ay ugu tala galeyn in ay soo saaraan Xeer ay kaga ilaalin karaan waxyeeladda tawaradda ay u geysanayaan dadka ,wuxuu sheegey in 100/90 ay yareyndoonaan ayna gaarsiindoonaan 100/10.

Su'aal

Xildh.Cusmaan Aadan Dhuubow,wuxuu weydiiyey in faah-faahin laga siiyo Guddiga Madaxa Banaan ee Heer Qaran,wuxuuna soo jeediyey in la raaco Mabaadi'da Dastuurka.

Guddoomiyaha wuxuu sheegey in Qod.5-aad iyo Qod.8-aad ee Dastuurka ay tilmaamayaan Guddiga Madaxa Banaan.

Su'aal

Xildh.Maxamed Nuuraani Bakar,wuxuu weydiiyey houmarka ay wasaaraddu ka gaartey Isgaarsiinta.

Jwb.Wasiirka

Wuxuu sheegey in isgaarsiinta iyo xeerkaan ay u shaqeynayaan Qaranka ,waa dan guud ee ma aha dan gaar ah waxayna la yeesheen Dadweynaha wadatashi ayna ka soo sameeyeen talooyin buuxa.

Su'aal

Xildh. Bishaar Ugaas wuxuu weydiiyey sida shisheeyaha shisheeye ay u isticmaala yaan Towerada .

Jwb.Wasiirka

Wuxuu sheegay in marka hore shirkadaha wadaniga ah ay shirkadaha shisheeye u celinayaan lacago lagu heshiinaayo si ay ula isticmaalaan towerada .

Su'aal

Xildh. Cabdi Nuur, shirkadaha Mabaadi qaas ayey sameysteyn ,sidee loo maareynkaraa?

Jwb. Wasiirka ,wuxuu sheegay shariikadaha imaandoona waxay la isticmaalido- onaan Towerada iyagoo kharash loo celinaayo.

Guddoomiyaha wuxuu sheegey Qod.44 ilaa 55-aad Gudiga Isgaarsiinta Golaha Shacabka in loo gudbiyo Xeerkaan Isgaarsiinta Qaranka.Maalinta Arbacada ahna laysku soo noqondoono.

- Lana akhrindoona akhrinta 1-aad ee hindise sharciyeedka Iibka Qaranka

- Lana gelidoono akhrinta 3-aad Xuduudaha iyo Arrimaha Federaalka,Waxaana loo codeynayaa maalinta sabtida ah ,wuxuu sheegay in uu kula talinayo Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka ay soo dadaalaan.

Wuxuu intaa ku darey in Guddoomiyaha dhankiisa uu ka dhamaadey xishood qofkii maqnaadada 8-casho maalintii waxaa laga jarayaa \$100(Boqoldolar)

Kal.5-aad Kul.18-aad uu shir-guddoominaayey Guddoomiyaha Barlamanka FS Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan (Jawaari), wuxuu sheegey in shirka xiranyahay saacaddu markey aheyd 1:00gd.